

Warar Kooban

Nofeembar 05, 2020

XOGTA KOOFID-19

COVID-19 LIISKA HUBINTA MAALINLAHA CAAFIMAADKA ALBERTA (EE CARRUURTA KA YAR 18)

Guudmar

Liiskan hubinta wuxuu khuseeyaa dhammaan carruurta, iyo sidoo kale dhammaan ardayda dhigata xanaanada illaa Fasalka 12, oo ay ku jiraan ardayda dugsiga sare ee ka weyn 18 jir. Carruurta waa in la baaraa maalin kasta iyagoo dhammaystiraya liiskan hubinta ka hor intaanay aadin dugsiga, daryeelka carruurta ama howlo kale. Carruurta waxay u baahan karaan waalid ama ilaaliye ka caawiya inay dhammaystiraan qalabkan baaritaanka.

Su'aalaha Baaritaanka

1. Ilmaha ma leeyahay:

(Dooro mid kasta ama dhammaan kuwa suurtoogalka ah)

<p>Ma u safartay meel ka baxsan Kanada 14kii maalmood ee la soo dhaafay? Markaad geleyso ama aad ku laabaneyso Alberta katimid meel ka baxsan Kanada, shakhsiyaadka waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inay karantiil galaan muddo 14 maalmood haddii aysan ka diiwaangashanayn Mashruuca Tijaabada Caalamiga ah ee Xudduudaha Alberta ee KOOFID-19</p>	<p>HAA</p>	<p>MAYA</p>
<p>Xiriir dhow ma la leedahay kiis KOOFID-19 14-kii maalmood ee la soo dhaafay? Xiriir waji-ka-waji oo 2 mitir ah 15 daqiiqo ama ka badan, ama xiriir toos ah oo jirka ah sida isku duubista</p>	<p>HAA</p>	<p>MAYA</p>
<p>Haddii ilmaha uu ku jawaabo “HAA” mid ka mid ah kuwa kor ku xusan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ilmaha waxaa laga raba inuu karantiil galo mudo 14 maalmood laga bilaabo maalinta ugu dambeysa uu soo gaaray. <ul style="list-style-type: none"> ○ Haddii ilmaha kaqeyb qaadanayo Mashruuca Tijaabada Xuduudda Caalamiga Alberta ee KOOFID-19, waa inay u hoggaansamaan barnaamijka xayiraadaha ee waqti kasta. • Haddii ilmaha yeesho wax calaamado ah, adeegso Qalabka Qiimaynta ee AHS Khadka tooska ah (AHS Online Assessment Tool) ama wac Khadka Caafimaadka 811 si aad u go'aamisato inaad isbaarto haddii lagula taliyey. <p>Haddii ilmaha ku jawaabo “MAYA” labada kor ku xusan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • U gudub su'aasha 2. 		

Warar Kooban

2. Ilmaha ma leeyahay wax cusub oo bilow ah (ama ka sii daraya) astaamaha aasaasiga ah ee soo socda:

Qandho Heerkulka/heerkuleylka 38 darajo ama ka sareesa	HAA	MAYA
Qufac Joogto ah, in ka badan sidii caadiga ahayd, oo aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale sida neefta	HAA	MAYA
Neefta oo kugu yaraata Joogto ah, neef la'aan, aan awoodin inuu si qoto dheer u neefsato, oo aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la og yahay sida neefta	HAA	MAYA
Lumitaan ur ama dhadhan Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaano sida xasaasiyadda ama cilladaha neerfaha	HAA	MAYA
<p>Haddii ilmaha ku jawaabo "HAA" calaamadaha lagu garto su'aasha 2:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ilmuhu waa inuu ka karantiil galaa mudo 10 maalmood bilowga calaamadaha. • Adeegso Qalabka Qiimaynta ee AHS Khadka tooska ah (AHS Online Assessment Tool) ama wac Khadka Caafimaadka 811 si aad isugu diyaariso baaritaanka iyo inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan karantiilka. <p>Haddii ilmaha ku jawaabo "MAYA" dhammaan astaamaha su'aasha 2:</p> <ul style="list-style-type: none"> • U gudub su'aasha 3. 		

3. Ilmaha ma leeyahay wax cusub oo bilow ah (ama ka sii daraya) astaamaha kale ee soo socda:

Dhaxan Dhaxan qandho la'aan, oo aan la xiriirin inaad banaanka ka joogto cimilada qabow	HAA	MAYA
Cune xanuun / liqitaan xanuun leh Aan la xiriirin sababaha /xaaladaha kale ee la yaqaan, sida xasaasiyadda xilliyada ama falcelinta	HAA	MAYA
Sanka oo qulqulaya / neefqabasho Aan la xiriirin sababaha /xaaladaha kale ee la yaqaan, sida xasaasiyadda xilliyeed ama ka maqnaanshaha jawiga qabow	HAA	MAYA
Lalabbo, matag iyo/ama shuban Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida walaaca, daawada ama cilladda mindhicirka xanaaqa	HAA	MAYA
Cunto xumo oo aan la garanayn Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida walaaca ama daawada	HAA	MAYA
Muruqyo xanuun/ lafa xanuun Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida lafa xanuunka ama dhaawaca	HAA	MAYA
Madax xanuun Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida madaxanuunka nooca murugada ama dhanjafka joogtada ah	HAA	MAYA
Cudurka oo inta badan loo yaqaanno indhaha casaanka (Conjunctives)	HAA	MAYA

Warar Kooban

Haddii ilmuhu ugu jawaabey "HAA" HAL calaamadda su'aasha 3:

- Ilmahaaga ku hay guriga oo kormeer 24 saacadood.
- Haddii calaamaddooda ka soo fiicnaaneyso 24 saacadood ka dib, waxay ku laaban karaan dugsiga iyo howlahooda markay dareemaan inay caafimaad qabaan. Baaritaankooda maahan daruuri.
- Haddii calaamadaha **aysan ka soo fiicnaanin ama ka sii darin** 24 saacadood ka dib (ama haddii astaamo dheeri ah ay soo baxaan), isticmaal Aaladda Qiimaynta Internetka ee AHS ([AHS Online Assessment Tool](#)) ama wac Khadka Caafimaadka 811 si aad u hubiso haddii baaritaan lagula taliyay.

Haddii ilmuhu ku jawaabo "HAA" LABA AMA calaamado dheeraad ah sida su'aasha 3:

- Ilmahaaga ku hay guriga.
- Adeegso Qalabka Qiimaynta ee AHS Online ([AHS Online Assessment Tool](#)) ama wac Khadka Caafimaadka 811 si aad u go'aamiso haddii baaritaan lagula taliyay.
- Ilmahaaga wuu ku noqon karaa dugsiga iyo waxqabadyada mar haddii astaamahooda ka baxaan illaa ay ugu yaraan kasoo wareegatay 24 saacadood tan iyo markii ay astaamuhu bilaabeen.

Haddii ilmuhu uga jawaabo "MAYA" su'aalaha oo dhan:

- Ilmahaaga wuu tegi karaa dugsiga, daryeelka caruurta iyo/ama howlahooda kale.

Fadlan ogow: Haddii ilmahaaga leeyahay wax calaamado ah oo ka mid ah liisaska kor ku xusan, ha u keenin inay booqdaan xarun joogta ah ama xarun daryeel degdeg ah 10 maalmood laga bilaabo markay astaamaha bilaabmeen/illaa ay calaamadaha laga waayo (hadba kan dheer), haddii aysan helin natiijada baaritaanka KOOFID-19 aadna dareemeeto fiicnaan.